Warbixin ku saabsan lacagta macmiisha laga qaado ee ku salaysan barbaarinta ilmaha ee aasaasiga ah ee xanaanada 1.8.2020

Sharciga bixinta lacagta barbaarinta ilmaha ee aasaasiga ah (1503/2016)

SIDA LACAGTA MACMIISHA LAGA QAADO LOO QOONDEEYAY

Lacagta laga qaado waalidka ilmaha loo barbaarinaya, waxay ku salaysan tahay sharciga bixinta lacagta ee barbaarinta ilmaha. Lacagta dadka laga qaadaa, waxay ku xidhan tahay, qosku inta uu dhan yahay, sida ay adeegga ugu baahan yihiin, iyo dakhliyada soo gala ee aan weli la cashuurin. Waa kuwan hoos ku qoran musharka qoysaska soo gala iyo inta lacagta xanaanada qoys kasta ku soo hagaagaysa:

Dakhliga lacagta ah ee qoyska soo gala, laga bilaabo 1.8.2020

Inta qof ee qoysku yahay	Musharkooda €/bishii	brosentiga laga goynayo musharka, markuu dhaafo inta loogu talo galay	Musharka ugu badan, iyo lacagta ay bixinayaan
2	2136	10,70	4827,59
3	2756	10,70	5447,59
4	3129	10,70	5820,59
5	3502	10,70	6193,59
6	3874	10,70	6565,59

Lacagta ugu badan ee ilmaha ugu horeeya laga qaadaa waa 288 €/bishii ilmaha 2 aad waa 144€/bishii

Qoska waxa la odhan karaa dadka isku dakhliga ah ee guriga ku wada nool ee isqaba ama saaxiibka ah iyo ilmaha iyagu waalidka u yihiin ee guriga kula nool ee 18-sano ka yar. Haddii qoysku ka badan yihiin 6 qof, waxa loo xisaabinaya in ilmo kasta oo qooska lixda ka badan in qiimahiisu noqdo 144 euro.

Ilmuhu wuxuu xaq u yeelanayaa in uu helo macluumaadka barbaarinta ilmaha, markay fasaxyadda waalidku dhamaadaan. Macluumaadka barbaarinta ilmahuna wuxuu dhamaanayaan markuu ilmuhu bilaabo iskuulka fasalka 1aad.

Lacagta laga dhimo ilmaha walaalaha ah

Haddii ilmo walaalo ah lagu barbaariyo xanaanooyinka degmada. Ilmaha ugu yar haddii laga bixiyo lacagta barbaarinta ilmaha ee joogtada ah ee xanaanada 5 §, waa in ilmaha isaga ku xiga ee sida joogtada ah xanaanada u taga, laga qaadaa boqolkiiba 50%. Caruurta kale ee ku xigta ilmahaana waa in laga qaadaa boqolkiiba 20%. Marka ilmaha lacagta laga qaadayo, waxa laga xisaabinayaa ilmaha ugu horeeya ee ugu yar inta laga qaadayo, kadib ayaa kuwa kale wax looga dhimayaa sidan aan kor ku soo qornay.

Sida barbaarinta loogu baahan yahay

Sidan ayey lacagta barbaarinta ee ilmaha laga bixiyaa, u kala baxaysaa:

Sida waalidiintu xanaanada ugu baahan yihiin	iyo inta uu qiimaha barbaarintu brosenti ahaan yahay
Barbaarin dhamaystiran oo maalin walba ah	100%
Barbaarin dhamaystiran oo 15 maalmood/bishii ah	75%
Barbaarin dhamaystiran oo 10 maalmood/bishii ah	50%
Barbaarin ugu badnaan 20 saacadood usbuucii	50%
Barbaarin ugu badnaan maalintii 5 saacadood	60%
Barbaarin ugu badnaan maalintii 5 saacadood oo bishii 15 maalmood ah	45%
Barbaarin ugu badnaan maalintii 5 saacadood oo bishii 10 maalmood ah	30%

Lacagta xanaanadu waxay ku xiran tahay mushaharka qofka oo aan cashuurnayn. Marka qoyska loo xisaabinayo lacagta xanaanada, waxa la eegayaa lacagta soo gasha ee xeer cashuuraadka hoostimaade ee musharka ama ganacsiga ah iyo kuwa xeer cashuuraadka ka baxsan ee ay ka kid yihiin lacagta iibinta

geedaha iyo 5 % oo ah lacagta fasaxa ee qofka shaqaalaha la siiyo. Lacagta ilmo korinta ama ilmo-taageerku xitaa way saamaynayaan lacagta xanaanada ee barbaarinta ilmaha. Haddii qoyska mushaharka bisha soo galayaa uu is bedbedelayo, waxa la xisaabinayaa isku cel celiska muda dheer.

Soo sheegidda dakhliga ku soo gala
Waxa qoyska ku waajib ah, marka ay booska xanaanada helaan in ay bil gudaheed ku soo sheegaan dakhlliga lacagta ee reerka soo gala. Waxa lacagta dakhliga ee qoyska soo gala lagu soo gudbin karaa, warqadda codsiga ee ku jirta bogga internetka ee lagu sharaxay lacagta macluumaadka barbaarinta ilmaha. Hadii qoysku soo sheegi waayaan dakhligooda soo gala, waxa lagu dalacayaa lacagta ugu badan ee qofka laga qaado

Qoyska dakhliga lacagta ah ee soo gala, waxa laga hubinayaa diwaanka rajistarka mushaharka ama waraaqaha uu qoysku soo diro ee dakhligooda laga arkayo. Macluumaadka Kela.da, waxa laga dalbanayaa xafiiska Kela.da. Waa in qoysku sidoo kale soo sheegaan dakhliyada kale ee soo gala. Xitaa haddii aan jirin dakhliyo lacag ah oo qoyska soo galaa, waa in foomka codsiga ee dakhliga la buuxiyaa.

Qofka ganacsadaha ah, waaa in u buuxiyaa foomka lagu cadaynayo dakhliga ganacsdaha soo gala iyo lifaaqyadiisa oo dhan.

Ogolaanshaha lagacta ugu badan
Qoysku wuxuu sidoo kale ogaan karaa in ay bixiyaan lacagta ugu badan ee xanaanada layska qaado oo ay ka buuxin karaan codsi ama foom bogga internetka ee barbaarinta aasaasiga ee ilmaha.

Isbedelka dakhliga, tirada qoyska ama adeegooda noocaas ku saabsan
Wixii isbedel ah ee qoyska ku soo kordhaa waa in loo soo sheegaa xarunta barbaarinta ilmaha qaybteeda lacagta macmiisha. Waxa lagu soo sheegi karaa cosiga ama foomka ku jira bogga internetka ee bogga barbaarinta ilmaha ee aasaasiga ah.

Lacag ka dhimista qoyska
Waxa la dalban karaa in qoyska laga yareeyo ama laga wada daayo lacagta barbaarinta ilmaha. Lacagta barbaarinta ilmuhu waxay marka hore ku salaysan tahay dakhliga qoyska soo gala iyo arimaha kale ee u dhigma. Haddii xaaladda qoyska ay tahay, mid kalifaysa in lacagta barbaarinta ilmaha wax laga daayo ama laga wada daayo, waa in ay soo codsadaan. Waxa markaa go'aanka lagu salaynayaa, ogolaanshaha ku saabsan lacagta nolosha qaybteeda ka hortagga duruufa qofka ku iman kara. Lacag ka daynta qoyska, maaha mid bilihii la soo dhaafay khusaynaysa, waxay ku saabsan tahay uun bishaa markaa lagu jiro iyo horaanteeda, markaas oo codsiga lacag dhimista loo soo gudbiyey xarun-adeegga barbaarinta iyo waxbarashada. Waxa qoyska tusaale ahaan lacagta laga dhimi karaa, marka la arko in dakhligoodu uuna ku filnayn lacagta laga rabo ee barbaarinta ilmaha ama in lacagtaa laga qaadayaa ay kalifayso in ilmahoodu u baahdo daryaal aad u wayn lacag la'aan darteed.

Wakhtiga ay tahay in la bixiyo lacagta barbaarinta ilmaha
Lacagta barbaarinta ilmaha waxa la soo diraa bisha dhamaadkeeda. Bishu markay dhamaato, waxa bishaa lacagteeda la bixinayaa bisha dambe dhamaadkeeda. Tusaale ahaan bisha 5aad lacagteeda waa in ugu danbaystii la bixiyaa bisha 6aad dhamaadkeeda. Ribada la korsaarayaa, waxay ku salaysan tahay sharciga ribada biilasha. Lacagaha wakhtogooda lagu bixin waayo, waxa loo dirayaa xafiisyada lacagaha khsabka ku soo uruursada (perintötoimisto).

Siday barbaarinta ilmuhu ku bilaabmayso kuna dhamaanayso
Haddii ilmuhu joojiyo xanaanada bishii oo aan dhamaan, waxa waajib ah in lacagta bishaa ee jadwalka ku qoran la bixiyaa. Haddii ilmuhu sidoo kale xanuun dartii u maqan yahay, waxa loo arkaa in ay tahay maalin-xanaanayn. Waxa uu macluumaadka barbaarintu ka bilaabmayaa, maalinta uu ilmuhu bilaabayo xanaanada oo qoyskuna booska xanaanada qaataan.

Macluumaadkan barbaarinta ilmahu ma laha wakhti khaas ah oo aad soo sheegaysid in iaad ilmaha ka joojinayso xanaanada. Waad joojin kartaa wakhti kasta, waa in goobta xanaanadu heshaa joojinta macluumaadka xanaanada uun. Waxa macluumaadka lagu joojin karaa bogga internetka ee magaalada Tampere. Boggaas waxa ku jira codsi lagu joojin karo xanaanada.

Maqnaanshaha
Haddii ilmuhu uu 11 beri in ka badan ka maqan yahay xanaanaynta bishaa, waxa lacagta xanaanada ee bisha la bixiyo laga qaadayaa ilmaha kala bar. Haddii se ilmuhu uu bukaan yahay bisha oo dhan, wax lacag

ah lagama qaadayo. Haddii se ilmuhu uu iskii u maqan yahay bishoo dhan, lacagta xanaanada waa in la bixiyaa kala baroow bar. Marka uu ilmuhu xanaada caadi u tago, waxa uu bixinyaa lacagta bisha oo dhan. Haddii reerku heshiis leeyihiin maalin maalin ah, markaa waxa la eegayaa inta uu ilmuhu maqan yahay iyo inta uu goob joog yahay.

Faahfaahin dheerad ah oo ku saabsan lacagta barbaarinta ilmaha ee xanaanada:
https://www.tampere.fi/varhaiskasvatus-ja-koulutus/varhaiskasvatus/asiakasmaksut.html
Iimayl asiakasmaksut.paivahoito@tampere.fi
Taleefan 040 180 8476 (isn–kha 9.00-11.00)